

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة



الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 1da Abriil 1988 Lr. 4

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba -- **BUKUNKA:** Sanaadi waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey waxaa ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

- SHARCI L. 7 ee 10 Maarso 1988, Oggolaansho
Heshiis Maalgelin Mashruuc dhexmaray
J.D.S. iyo Bankiga M/gelinta Reer Yurub Bog; 257
- SHARCI L. 8 ee 10 Maarso 1988, Oggolaansho
Heshiis Horumarineed ee dhexmaray J.D.S.,
iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah » 258
- SHARCI L. 9 ee 10 Maarso 1988, Oggolaansho
Heshiis Maalgelin oo dhexmaray J.D.S. iyo
Bankiga Maalgelinta Reer Yurub iyo Wa-
kaaladda X.K. Ummadda » 259
- SHARCI L. 10 ee 10 Maarso 1988, Oggolaansho
Heshiis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo
Bankiga Horumarinta Afrika. » 260

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 20 ee 10 Maarso 1988, Meelmarin Heshiis Amaaheed »	261
DECREE No. 20 ee 10 Maarso 1988, Instrument of ratification. »	262
XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 21 ee 10 Maarso 1988, Meelmarin Heshiis deyn horumarineed. »	263
DECREE No. 21 on 10 March 1988, Instrument of ratification. »	264
XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 22 ee 10 Maarso 1988, Meelmarin Heshiis Maalgelin Mashruuc. »	265
DECREE No. 22 on 10 March 1988, Instrument of ratification. »	266
XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 23 ee 10 Marso 1988, Meelmarinta Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray J.D.S. H. Afrika. »	267
DECREE No. 23 on 10 March 1988, Instrument of ratification. »	268

SAXID QALAD «CORREGENDUM»

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

Sharci Lambar 7 Tr. 10.3.88, Oggolaasho Heshiis Maalgelin Mashruuc dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Maalgelinta Reer Yurub Mashruuca dib u habeynta Korontada Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la Oggolaaday Heshiis maalgelin Mashruuc oo dhexmaray J.D.S. Iyo Bankiga Maalgelinta Reer Yurub, kuna saabsan Maalgelin Mashruuc Iacag dhan ECU.3.C Milyan oo loogu talo galay dib u habeynta Korontada Xamar

2. Heshiiska Waxaa lagu kala saxiixday magaalada Luxembourg Tr. Markay ahayd 15.9.1987.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiskan ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan waxaa dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. Iyo qodobbada Heshiiskan.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey inuu meel mariyo Heshiiskan.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.3.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Sijaad Barre

Sharcii Lambar 8 Tr. 10.3.88, Oggolaasho Heshiis Horumarineed ee dhexmaray J.D.S. Iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah, kuna saabsan Mashruuca dib u habeynta Korontada Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiis deyn horumarineed oo dhexmaray J.D.S. Iyo Ururka Horumarinta Caalamiga, kuna na saabsan lacag deyn horumarineed oo dhan S.D.R. 9,700,000 (Sagaalmalyan iyo Toddoba boqol kun) oo loogu talo galay dib u habeynta awood Korontada iyo tabarta ee Xamar.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Washinton ee Dalka Mareykanka.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. Iyo qodobbada Heshiiskan.

Qodobka 3aad

J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey inuu meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.3.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 9 Tr. 10.3.88, Oggolaasho Heshiis Maalgelin Mashruuc oo dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Maalgelinta Reer Yurub iyo Wakaaladda Xoogga Korontada Ummada, Mashruuca dib u habeynta Korontada Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiis maalgelin Mashruuc oo dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Maalgelinta Reer Yurub iyo Wakaaladda Xoogga Korontada Ummada, kuna saabsan maalgelin Mashruuc Lacag dhan ECU 10.0 Milyan oo loogu talo galay Korontada Xamar.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Luxembourg Tr. markay ahayd 18.9.1987.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharcigan isagoo Iifaag u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan waxaa dhaqan-gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. Iyo qodobbada Heshiiskan.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey inuu meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta

Qodobka 4aad

Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.3.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 10 Tr. 10.3.88, Oggolaasho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. Iyo Bankiga Horumarinta Afrika kuna saabsan Mashruuca dib u habeynta Awoodda Koronta Ja ee Muqdisho.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday heshiis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. Iyo Bankiga Horumarinta Afrika, kuna saabsan Amaah Lacageed oo dhan UA. 8.000.000 (Unit of account) oo loogu talo galay Mashruuca dib u habeynta awoodda Korontada ee Muqdisho.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Abidjan ee Dalka Ivory Coast, Tr. markay ahayd 2.9.1987.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lijaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. Iyo qodobbada Heshiiskan.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey inuu meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.3.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

X E E R

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 20 Tr. 10.3.1988, Meelmarinta heshiiska amaaheed dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Maalgelinta Reer Yurub, kuna saabsan dib u habeynta Korontada Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY. Qod. 67, faqradda 5, iyo qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 7 ee 10ka Marso 1988 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku oggo laaday heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskan la meelmarayo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey heshiiska amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Maalgelinta Reer Yurub oo lagu kala saxiixday magaalada Luxembourg Tr. Markay ahayd 15.9.87, kuna saabsan Mashruuca dib u habeynta Korontada Xamar.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhacqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.3.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree No. 20 of 10.3.88, Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 7 of 10.3.88, on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Finance Contract between the Somali Democratic Republic and European Investment Bank and Ente Nazionale Energia Elettrica, signed at Luxembourg on 18th September 1987, and concerning the Mogadishu Power Rehabilitation Project, is hereby Ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be Published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10.3.1988.

THE PRESIDENT OF SDR

Mohamed Siad Barre.

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 21 Tr. 10.3.1988, Meelmarinta heshiis deyn horumarineed dhexmaray J.D.S. Iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah, kuna saabsan mashruuca dib u habeynta Korontada iyo Tamarta ee Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5 iyo qod. 82, faqrada 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY. Sharciga Lambar 49 ee 23ka Dese. 1984.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 8 ee 10ka maarso 1988 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku oggo jaaday heshiiska kor ku tiimaaman.

MARKUU TIXGELIYEEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay heshiiska deynta horumarineed ee dhexmaray J.D.S. iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah, kuna saabsan Mashruuca dib u habeynta Korontada iyo tamarta ee Muqdisho, laguna kala saxiixday magaalada Washington ee Dalka Mareykanka.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka J.D.S. awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhacaaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.3.1888.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Decree no. 21 of 10.3.1988, Instrument of ratification.
THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82,
Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984,

HAVING SEEN: The Law no 8 of 10.3.88, on the base of which the people's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Development Credit Agreement (Power Rehabilitation and Energy Project) between the Somali Democratic Republic and International Development Association, signed at Washington, D.C, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be Published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10.3.1988.

THE PRESIDENT OF SDR

Mohamed Siad Barre.

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 22 Tr. 10.3.1988, Meelmarin Heshiis maalgelin Mashruuc dhexmaray J.D.S. & Bankiga Maalgelinta Reer Yurub iyo Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda, kuna saabsan dib u habeynta Korontada Xamar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 68, faqradda 5, iyo qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Dise. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 9 ee 10ka Maarso 1988 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY. In ay lagama maarmaan tahay In Heshiiskan la meelmarayo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiis maalgelin Mashruuc oo dhexmaray J.D.S. & Bankiga Maalgelinta Reer Yurub iyo Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda, kuna saabsan maalgelin loogu talo galay Mashruuca dib u habeynta Korontada Xamar.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhacay geelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.3.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree No 22 of 10.3.1988, Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 9 of 10.3.88, on the base of which the people's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Finance Contract between the Somali Democratic Republic and European Investment Bank, signed at Luxembourg on 15th september 1987, and concerning the Mogadishu Power Rehabilitation Project, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10.3.1988.

THE PRESIDENT OF SDR

Mohamed Siad Barre.

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 23 Tr. 10.3.1988, Meelmarinta Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika kuna saabsan Mashruuca dib u habeynta awoodda Korontada ee Muqdisho.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo qod. 82, faqrad da 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Dise. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 10 ee 10ka Marsa 1988 oo Guddiga Joogtada ah ee Gollaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska sare ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEEY: In ay lagama maarmaan tahay In heshiiskani la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka laad

Waxaa la meelmariyey heshiiska amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kuna saabsan Mashruuca dib u habeynta awoodda Korontada ee Magaalada Muqdisho, laguna kala saxiixday magaalada Abiidjaan 2dii Sebtembar 1987.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkanii wuxuu dhacaa gelayaa isla marka uu saxiixdo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.3.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree no. 23 of 10.3.1988, Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN. The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 10 of 10.3.1988, on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Fund (Mogadishu Power System Rehabilitation project), at Abidjan on September 2, 1987, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be Published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10.3.1988.

THE PRESIDENT OF SDR

Mohamed Siad Barre.

SAXID QALAD SHARCIYO IYO XEERAR

FAAFIN RASMI L. 4 EE 1.4.88

CORRIGENDUM

A) SHARCIYO

1) Taariikhda saxa ah ee la kaja saxiixday heshiiska ku tilmaaman sharciga L. 7 ee 10.3.1988 waa 24.11.1987.

2) Taariikhda saxa ah ee la kala saxiixday heshiiska ku tilmaaman Sharciga L. 8 ee 10.3.1988 waa 17.12.1987.

3) Taariikhda saxa ah ee la kala saxiixday heshiiska ku tilmaaman Sharciga L. 9 ee 10.3.1988 waa 24.11.1987.

4) Taariikhda saxa ah ee la kala saxiixday heshiiska ku tilmaaman Sharciga L. 10 ee 10.3.1988 waa 11.2.1988.

B) XEERAR (Decerees)

1) Taariikhda saxa ah oo la kala saxiixday heshiiska ku tilmaaman Xeerka L. 20 ee 10.3.1988 waa 24.11.1987.

(The signed date of the agreement mention in the decree n. 20 on 10.3.1988 is 24.11.1987..

2) Taariikhda saxa ah oo la kala saxiixday heshiiska ku tilmaaman Xeerka L. 21 ee 10.3.1988 waa 17.12.1987..

(The signed date of the agreement mention in the decree n. 21, on 10.3.1988 is 17.12.1987.

3) Taariikhda saxa ah oo la kala saxiixday heshiiska ku tilmaaman Xeerka L. 22. ee 10.3.1988 waa 24.11.1987.

(The signed date of the agreement mention in the decree n. 22 on 10.3.1988 is 24.11.1987.

4) Taariikhda saxa ah oo la kala saxiixday heshiiska ku tilmaaman Xeerka L. 23 ee 10.3.1988 is 11.2.1988

(The signed date of the agreement mention in the decree n. 23. on 10.3.1988 is 11.2.1988.